Göteborgs Stad

# Dugsigee ayaad u dooneysaa ubadkaaga?

Ilmahaagu waxa uu bilaabi doonaa fasalka barbaarinta ama waxa uu u baahan yahay in uu bedesho iskuulka sanadka soo socda, waxaad haysataa fursad aad ku codsan kartid iskuulka.

Bogga **goteborg.se/onskaskola** waxaad ka arki kartaa halka iskuuladu ku yaalliin, waxaad akhrin kartaa sharciyada waxaadna ka codsan kartaa iskuulada aad rabto **15-ka bisha Janaayo ilaa 15-ka bisha Febraayo**. Halkan waxa kale oo aad ka heli kartaa macluumaadyo ku qoran luqado badan.

Waxaad isticmaali kartaa adeegga elektaroonigga ah ama foomka. Haddii ilmuhu leeyahay laba masuul, labaduba waa inay saxiixaan codsiga si uu u noqdo mid ansax ah.

Haddii aadan codsi soo dirin, ilmahaagu wuxuu heli doonaa boos iskuul oo ugu badnaan u jira guriga uu deganyahay laba ilaa lix kiiloomitir, iyadoo ay ku xidhan fasalka uu ilmahaagu bilaabayo. Dhamaadka bisha Maarso ayaad heli doontaa aqbalaadda iskuulka lagu qoray ilmahaaga.

**Tani waxay khusaysaa marka ay dadka soo codsaday ay ka badanyihiin boosaska bannaan.**

1. **Mudnaan-siinta walaalaha.**
2. **Dhowaanshaha ku dhisan isbarbardhig** – Ardayga ugu fog iskuulkiisa beddelka noqon lahaa ayaa helaya booska, ma aha kan degan iskuulka agtiisa.
3. **Dhowaanshaha ugu dhow** – Haddii laba arday ay isku masaafo u jiraan iskuuladooda kale, kan ugu dhow ayaa booska helaya.
4. **Qori tuur.**



**Nala soo xidhiidh haddii aad wax su'aalo ah qabtid!!**

**Taleefoon: 031-365 09 60**
**E-mayl: grundskola@grundskola.goteborg.se**